

Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta akhrinta iyo sheegidda

Waalidiinta qaaliga ah

Sidda wadajir u Akhrinta iyo Taariikh oga sheegaynta waxay dhiirigelisaa carruurta oo dhan. Sababtoo ah carruurta waxay jecel yihiin sheekooyinka. Marka loo akhrinayo waxay bartaan inay dhagaystaan iyo ku hadalka. Waxay kaloo ka caawinaysaa inay muujiyaan dareenkooda.

Buuggan, waxaad adiga iyo Qoyskaaga si wadajir ah ugu baran kartaan nolol maalinka Jarmalka waxaadna ku ogaan kartaa ereyada ugu horreeya ee Jarmalka. Waxaan idin rajeyneynaa adiga iyo reerkaagaba farxad badan inta aad sidda wadajirka akhrineysaan oo aad sheekooyinka u sheegeysaan!



Si wada jir ah u Barta nolol maalmeedka Jarmalka

Maxaa ka jira goobta ciyaarta ama in laga ogaado suuqa? Ilmahaaga kala hadal sawirrada ku jirta buugga "Waxaan nahay saaxiibo". Tiri waxaad ku aragtid sawirada, ama weydii su'aalo ku saabsan sawirada. Dabcan si dabiici ah, tani waxay keenaysaa wadahalada ku saabsan deegaanka cusub iyo dhacdooyinka maalinlaha ah.



Wadajir u Barta ereyada Jarmalka ee ugu horeeya

Buugga waxaad ka heli doontaa bog kasta oo labanlaab ah ereyo Jarmal ah oo u dhigma sawirka iyo lambar- QR ah oo ku jira xumbada hadalka. Haddii aad ku baarto lambarka-QR ah taleefanka gacanta, waxaa lagu akhrin doonaa ereyada. Marka waxaad si ciyaar leh oo wadajir ah u heli kartaan kuna celcelin kartaan ereyada Jarmalka ee ugu horeeya adiga iyo ciyaalkaagaba.



Si wadajir ah u akhriya una sheega sheekooyinka

Markaad u akhrinaysid, waxaad wakhti badan la qaadataa ciyaalkaaga. Waxay abuurtaa isku soo dhawaansho. Ilmahaagu wuxuu ku xirnaan doonaa waqti leh dareen badan oo wanaagsan. Waxay kaloo ka caawinaysaa ciyaalkaaga inuu barto sida ugu wanaagsan ee wax loo akhriyo goor dambe. Uma baahnid inaad af Jarmal aad wax ugu akhridid, ku samee xataa luqadda kale ee aad Ilmahaaga kula hadashid.

Hayadda Akhrinta ayaa maamusha barnaamijka " Akhrisku wuu nagaarsiiyaa horumar. Akhriska Bilowga ee loogu talagalay Carruurta Qaxoontiga ah " ayadoo wakiil ka ah ama ku hadlaya magaca Wasaaradda Waxbarshada iyo Cilmi-baarista ee Federaalka.

Ku raaxayso akhriska iyo sheekooyinka!

www.lesen-bringt-uns-weiter.de

